NATIONWIDE CHILDREN'S
When your child needs a hospital, everything matters.

Helping Hand™ Health Education for Patients and Families

# Baarista Falcelinta Maqalka ee Maskaxda (Auditory Brainstem Response) (ABR) ee leh Qayb suuxdinta ama Suuxdinta wada dhamaystiran

## Auditory Brainstem Response (ABR) with Sedation or Anesthesia (Somali)

Baarista Maqalka Falcelinta ee Maskaxda (ABR) waa baaris hubinaysa luminta maqalka. Baaritaanka ABRs waxaa lagu arkaa sida wanaagsan ee dhawaaqa uga guurayo dareemaha maqalka una gudbayo maskaxda. Waxaa badanaa lagu sameeyaa dhallaanka iyo carruurta aan samayn karin baaritaanno kale oo maqalka sababtoo ah da'dooda ama heerka koriimadooda.

### Waxa uu yahay Baaritaanka

Istiikaro yaryar oo loo yaqaan electrodes ayaa lagu dhejiyaa dheg kasta gadaasheeda ama horteeda iyo sujuuda hore. Kadibna eerfoona gaar ah ayaa dhegaha ilmahaaga loo galiyaa si loogu diro (gudbiyo) dhawaaqyada. Waxyaalaha electrodes uu qoro ayaa ah waxa uu ilmaahagu maqli karo. Baaritaankaani waa mid badbaado ah. Wax dhibaata ah uma geeysaneyso ilmahaaga.

### Ka Hor Baaritaanka

- Kalkaaliso ayaa ku soo wici doonta qiyaastii 1 ilaa 2 maalmood kahor baaritaanka si loo xaqiijiyo taariikhda iyo waqtiga. Kalkaalisada ayaa sidoo kale kuusheegaysa waxa cunugaagu cuni karo ama cabi karo baaritaanka kahor.
- Hadii cunugaagu qaato daawo, kalkaalisada ayaa kuusheegaysa nooca daawada aan lasiin karin cunuga baaritaanka kahor.


©2019, Waxaa dib loo eegey 2023, Nationwide Children's Hospital
Sii socda…

- **Raac tilmaamaha la bixiyay ee ku saabsan cuntada, cabitaannada, iyo daawooyinka ka hor baaritaanka cunuggaaga. Hadii aadan raacin tilmaamahaani, waxaa la joojin karaa baaritaanka.**
- Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, ka wac kalkaaliyayaasha diwaangelinta ka hor/suuxdinta:
  - Columbus: (614) 722-3850
  - Toledo: (419) 251-4630

## Noocyada Suuxinta

- **Ilmahaaga waxaa loo qorsheeyay inuu helo:**
  - ☐ Suuxdin qafiif ah
  - ☐ Suuxdin dhamaystiran
- **Suuxinta khafiifka** ah waa hurdo fudud. Goortu uu ilmahaagu yeesho suuxdinta fudud, ma ka warqabaan waxa dhacaya. Iskood ayeey u neefsadaan oo waxaa laga yaabaa inay ku kacaan ama ka jawaabaan waxayaalaha ah sida codka, u wucista ama taabashada. **Xulushada suuxdintaani waxa kaliya oo lagu bixiyaa Cisbitaalka Qaranka ee Carruurta ee Toledo.**
- **Suuxdinta dhamaystiran** waa hurdo qoto dheer. Marka uu yahay ilmahaaga mid wada suuxsan, ilmahaagu garan maayo waxa dhacaya. Kama falceliyaan waxyaalaha ah sida codka u wicista, ama taabashada. **Tani kaliya waxaa laga bixiyaa Cisbitaalka Qaranka ee Carruurta ee Columbus.**

Carruurta leh mid ka mid ah kuwan soo socda ayaa laga yaabaa inay u baahdaan in la suuxiyo:

- Arrimo caafimaad oo adag
- Xaasisadaha ka timaada protiinka ukunta
- Dhibaatooyinka hawo mareenada
- Aadka ubuuran (BMI kasii wayn 35)
- Carruurta aan ka qaadan karin faleebo Xididaha (IV) iyadoon la suuxin
- Hore u lahaa dhibaato hurdo
- Cilladaha koromosoomyada
- Dhibaatooyinka wadanaha ee aan la daaweyn karin
- Autism-ka
- Dhaqamada xanaaqa ah, sida garaacid ama qaniinyada

## Maalinta Baarista - Suuxdin Fudud (Toledo Keliya)

1. Maalinta ballanta, waxaad iska xaadirin doontaa qaybta. Imow 90 daqiiqo kahor Baaritaanka ABR ee ilmahaaga.
2. Ka dib markaad is xaadiriso, adiga iyo ilmahaagu waxaad aadi doontaan unug. Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaanshaha oo u oggolaanaya qayb suuxinta ka dib markaad la hadasho dhakhtarka. Waxaad qolka la joogi karaa cunugaaga xilliga baaritaanka.
3. Ilmahaaga ayaa waxaa laga siin doonaa daawada suuxdina leenka xididka (IV) ama waxaa laga siin doonaa sanka. Kalkaalsida ayaa kuu sharixi doonta hababka aad u caawin karto ilmahaaga hadii laga siinayo daawada xididka (IV).
4. Kalkaalisada ama takhtarka ayaa siin doona ilmahaaga daawo oo la socon doona marka ay siiseexanayaan. Waxay la joogi doonaan ilmahaaga inta lagu jiro baaritaanka oo idil.
5. Dhaqatarka maqalka (Dhaqtarka maqalka ku taqsuusay) ayaa sameyn doona baarista. Waxay qaadan doontaa 30 ilaa 90 daqiiqo. Marka baaritaanku dhamaado, khabiirka maqalka ayaa kaala hadli doona natiijada.
6. Ilmahaaga si dhow ayaa loogu eegi doonaa qolka baarista illaa ay ka soo kacaan.
7. Kadib marka cunugaagu soobaraarugo, waxaa lasiinayaa biyo nadiif ah. Haddii uu biyaha cabi karo, waxaa laga yaabaa inuu qadaan karo buskudka. Ilamahaaga si gooni ayaa loola socon donaa ilaa laga soo saaro isbitaalka.

## Maalinta Baarista - Suuxdinta Fudud (Columbus Keliya)

1. Maalinta ballanta, waxaad aadi doontaa diiwaangelinta si aad isku xaadiriso. Imow 90 daqiiqo kahor baaritaanka ABR ee ilmahaaga.
2. Isdiiwaan gelinta ka dib, adiga iyo ilmahaagu waxaad aadi doontaan qolka qalliinka ka hor (pre-op). Waxaad saxeexi doontaa foom oggolaanshaha oo u oggolaanaya suuxinta dhamaystiran ka dib markaad la hadasho dhakhtarka. Kalkaalisada ayaa ilmahaaga geyn doonta qolka qalliinka. Waxaad joogi doontaa qolka sugitaanka inta baaritaan socdo.
3. Kalkaaliye ama dhaqtar ayaa siini doona daawada suuxidinta ayagoo ku siinaya afxir ama maaskaro. Kadib, waxay ilmahaaga ku xiri doonaan leenka xididka gacanta (IV) sifo ay u sii wadaan siinta daawa suuxdinta. Kalkaaliye ama dhakhtar ayaa ilaalin doona ilmahaaga oo la joogi doona inta lagu jiro baaritaanka oo idil.
4. Dhaqatarka maqalka (Dhaqtarka maqalka ku taqsuusay) ayaa sameyn doona baarista. Waxay qaadan doontaa 30 ilaa 90 daqiiqo. Goorta baaritaanku uu dhamaado, cunugaada waxaa loo wareejin doonaa qeybta daryeelka suuxinta kadib (PACU) waxaana si dhow loola socon doonaa ilaa ay ka soo kacaan.


Sii socda…

5. Dhaqtarka ku taqsuusay maqalka ayaa kula kulmi doona qolka sugitaanka ka dib baaritaanka si uu kaagala hadlo natiijada.
6. Goorta uu ilmahaago soo naaxo, ayaa waxaad awoodi doontaa inaad aragto. Waxay cabi karaan biyo caadi ah. Haddii uu biyaha cabi karo, waxaa laga yaabaa inuu qadaan karo buskudka. Si dhow ayaa loola socon doonaa ilaa isbitaalka laga soo saaro.